

LACAGTA

Kharashyada Diiwaangelinta (Qaybtiiiba)

- Qiimaha ugu Horeeya \$25
- Kharashka Cusboonaysiinta \$15
- Qiimaha ugu badan ee dhisme kasta \$2,500
- Kharashka ugu badan ee isku Dhismihiiba \$5,000 (Dhisme)

waxaa lagu sifeeyaa inuu yahay laba dhisme ama in ka badan dhismayaal isku meel ku yaal.)

Qiimaha Kormeerka (Qaybtiiiba)

- Dhismayaasha ka kooban 1-3 qayb \$50
- Dhismayaasha ka kooban 4 qayb ama in ka badan \$75

5 Sano Kormeer Kale Kharashyada

- \$50 qaybta ugu horeyo ee guryaha
- \$10 qayb kasta oo dheeri ah l
- Qiimaha ugu badan ee dhisme kasta: \$3,000
- Kharashka ugu badan ee dhismaha (complex): \$6,000

Lacgta lagu Xareeyo ee Kormeere Gaar ah (Warbixin Kasta)

- Kormeeraha Idman \$15
- Maamulka Guryaha ee Boston/Magaalowaynta Iskaashatada Guryaha ee Boston \$15

LACAGTA LAMA SOO CELINAYO.

Ka dhaafitaanada

- Guryaha ay leeyihiiin dowladda federaalka, dowladda gobolka, ama hay'addaha maxaliga ah l
- Guryaha qolqolka leh oo dowladda degmada ka haystati hooy oo sax ah

MANFACYADA

- Iska xaqqiji in guryaha kirada ay buuxiyeen ugu yaraan shuruudaha u degsan xeerka guryaha
- Milkiilkayaasha la baro wax ku saabsan xeerarka dowladda gobolka iyo tan maxaliga
- Dowladda Degmada (City) ka caawi inay kula soo xiriirto marka ay jiraan xaalad deg-deg ah ee dhanka gurigaaga
- Waxay wanaajisaa tayada guriga aad degan tahay ee gudaha magaalada Boston ku yaala

Shuruudaha diiwaangelinta, booqo:
www.boston.gov/rental-registration

Saacadaha Shaqada:

Isniin - Jimce, 8:00 a.m. - 4:00 p.m.



<https://bit.ly/RentalRegulation>



isd@boston.gov



617-635-5300

DIIWAANGELINTA IJAARKA & BARNAAMIJKA KORMEERKA

Kor u Qaadaya Nadaafada iyo Badbaadada Guryaha



DIIWAANGELIN

Diiwaangelinta ijaarka iyo kormeerka sharciga waxaa loogu talagalay in lagu hubiyo in kasta oo degan degmada Boston uu ku nool yahay guri ammaan ah oo nadiif ah. Barnaamijku waxaa qaybiyay laba shuruudood: diiwaangelin iyo kormeer.

Milkiilayaasha guryaha ijaarka oo dhan waa inay diiwaan galiiyan dhammaan guryaha ijaarka oo ay diiwaangeliyaan sanadkiiba inta u dhaxaysa 1da Janaayo - 1da Luulyo. Milkiilayaasha guryaha leh guryahooda ijaarka ah qatka interneetka ayay ka diiwaancelin karaan

www.boston.gov/rental-registration-portal.

Si guri aad u diiwaangeliso, milkiilayaasha gurigu waa inay fidiyaan macluumaadka soo socda:

- Cinwaanka guriga
- Macluumadka halka laga xiriilo milkiilaha
- Wakiil maxalli ah ee u fadhiya, haddii mulkiiluhu meeil Massachusetts ka baxsan uu ku nool yahay
- Tirada guud ee guryo ee dhismaha uu ka kooban yahay

Isdiienda angelinta waa in la cusboonaysiiyaa sannad kasta marka la gaaro 1da Luulyo. Guryaha milkiilaha uu degan yahay oo ka kooban lix qaybood ama ka yar waa in ay isdiienda angaliyaan sanad walba mar laakiin waa laga dhaafay lacagta diiwaangelinta iyo shuruudaha kormeerka.

GANAAK

Haddii aad buuxin waydo shuruudaha ama qodobada qaunuunkan waxaa lagu ganaaxaya lacag ganaax ah oo dhan \$300 gurigiiba ee bil kasta.

LA-TALINTA MILKIILAH

Xafiiska Mayors Office of Housing waxay taageero siiya mulkiilayaasha guryo Boston ku leh oo leh sagaal ama iyar oo guryo oo loogu talagalay mulkiilayaasha yaryar ee soo wajaha dhibaatooyin dakhligoodu xaddidan yahay, kiraystayaasha xaaladdoodu nugushahay. Macluumaad dheeraad ah, wac (617) 635-4200.

Dhammaan guryaha gaarka loo leeyahay, guryaha aan ku jirin ijaarka ee magaalada waxaa loo dooran doonaa kormeer kiro firfircooni ugu yaraan shantii sanaba hal mar.

Waaxda Adeegyada Kormeerka ayaa mulkiilayaasha guryaha kula xiriiri doonaa qaab qoraal oo faahfaahsan dalabyada lagu buuxinayo shuruudaha kormeer ka. Milkiilayaasha guryaha waxay samayn karaa kuwa soo socda:

- Kormeeraha guriyeynta ISD inaad kormeer ka codsato;
- Shaqaalaysiiso kormeere gaar ah oo u idman
- inuu ISD u qabto kormeera ijaarka;
- Warbixinada kormeerka inuu baasay ee ka socda Maamulka Guryeynta Boston ama Metropolitan,
- Boston Housing Partnership; ama
- Ka Codso Qorshaha Kormeerka Beddelka ah ee Shanta Sanadood.
- Waa inuu Ogeysiiska Xulashada kaga soo Jawaabbaa 30 maalmood gudahood.

Qorshaha Shanta Sano ayaa milkiilayaasha ka dhaafaya qaar ka mid ah shuruudaha kormeerka, laakiin dalabkan waxaa la siiyay oo keliya mulkiilayaasha leh taariikh wanaagsan oo ah u hoggaansanaanta xeerarka gobolka iyo degmada.

SU'AALAH INTA BADAN LA ISWAYDIYO

Miyaan u baahanahay inaan diiwaan geliyo gurigayga ijaarka ah?

Haa. Guri kasta oo ijaar ah oo ku yaal degmada Boston waa in la diiwaangaliyaan sanad walba marka la gaaro bisha Luulyo Guryaha Milkiilaha uu degan yahay oo ka kooban lix ama wax ka yar ma bixiyaan khidmadaha diiwaangelinta laakiin wali waa inay isdiienda angeliyaan sannad kasta.

I ma soo gaarin qaansheegtada kharashka diiwaangelinta.

Dowladda degmada wakhtiga hadda la joogo ma soo dirto qaansheegta diiwaangelinta kirada. Waa mas'uulyadda mulkiilaha guriga inuu isdiienda angeliyo ugu dambayn 1da Luulyo sannad kasta.

Guriga ayaan ku noolahay. Ma u baahanahay in aan diiwaangeliyo?

Haa, waad u baahan tahay inaad diiwaangeliso. Haddii gurigu ka kooban yahay lix ama in ka yar oo ah guri ijaar ah, waxaa lagaa dhaafay khidmadaha diiwaangelinta.

Waxaan ijaaraa qolal ganaci. Ma u baahanahay in aan diiwaangeliyo?

Maya, shuruudaha diiwaangelinta ijaarka waxay khusaysaa oo kaliya guryaha, oo ku ma jiraan dhulka ganaci.

Qatka interneetka ma ka diiwaangelin karaa oo lacagtana ma ka bixin karaa?

- Gurigaaga waa inaad ka diiwaangelisaa qatka interneetka.
- Lacagaha ujrada oo dhan qatka interneetka ayaa lagu bixin karaa